

WE ARE YOUR DOL



Department  
of Labor

## WAAXDA U HOGAANSANAANTA IYO WAXBARASHADA

### WAAXDA U HOGAANSANAANTA IYO WAXBARASHADA (DOCE)

Waaxda u Hogaansanaanta iyo Waxbarashada (DOCE) (oo horey loo aqoon jiray Waaxda Siyaasadaha iyo Arrimaha Socdaalka) waxay xaqiijisaa in adeegyada, barnaamijyada, iyo ilaalinada ee Waaxda Shaqada ay diyaar u diyaar u yihiin dhammaan shaqaalaha. Tani waxaa ku jira kooxaha sii kordhaya ee dadka u soo guuray Gobolka New York ee ka yimid dalal kale iyo kuwa ku hadla luuqadaha kale ee aan ahayn Ingiriiska.

### XIRIIRKA

DOCE waxay dadka soogalootiga ah, qaxootiyaasha, iyo dadka barta Luuqada Ingiriiska ku wargelisaa xuquuqahooda goobta shaqada. Waxaan u sheegnaa caawimaada ay bixiso Waaxda Shaqada ee Gobalka New York (NYS DOL), sida:

- Tallaabada la xariirta mushaarka aan la bixin, waqti dheeraadka ah, iyo dheefaha kale.
- Xaqiiqooyinka la xariira caymiska shaqo la'aanta
- Kaalmada shaqo raadinta iyo caawimaada xirfada
- Ku xirnaanshaha hay'adaha kale iyo kooxaha caawimaada bixiya
- Xog ku saabsan Ka ganacsiga Dadka

DOCE sidoo kale waxay mulkiilayaasha ganacsiyada yaryar bartaa xog ku saabsan:

- Sharciyada shaqada
- Waajibaadyada sharciga ah
- Ilaha Waaxda Shaqada ee caawin kara
- Ka ganacsiga Dadka

### SHARCIYADA IYO SIYAASADAH

DOCE waxay ka shaqeysaa xaqiijinta in Waaxda Shaqada Gobalka New York buuxiso baahiyaha soogalootiga, qaxootiyaasha iyo dadka barta luuqada Ingiriiska. Waxaan

dib u eegis ku sameynaa sida siyaasadaha, habraacyada iyo sharciyada NYSDOL u sameeyaan bulshadooda.

### DHIBANAYAASHA DEMBIGA

Ka ganacsiga dadka iyo shaqada xooga ah dembiyo looga faa'ideyso dadka reer New York, oo ay kujiraan soogalootiga, qaxootiyaasha iyo Dadka barta Luuqada Ingiriiska. DOCE waxay gacan ka geysataa dagaalka guud ahaan gobalka. Sidoo kale waxaan dhibanayaasha u gudbinnaa hay'adaha ka caawin kara inay helaan adeegyada ay u qalmaan sida ku xusn sharciyada gobalka ee la xariira dembiyada.

Dhibayaasha qaar kamid ah dembiyada ayaa codsan kara fiisoooyinka khaaska ah ee dawlada federaalka. Si ay codsadaan, waa inay xaqiijin ka helaan hay'ad fulinta sharciga qaabilsan. Ayadoo ay wehliso Waaxda Shaqada, DOCE waxay dib u eegtaa codsiyada xaqiijinada fiisaha U iyo T.

### BEERAHA

DOCE waxay ka shaqeysaa sidii ay ku adkeyn lahayd shirkadaha beeraha isku dhafka ah iyo shirkadaha waawayn ee New York. Sidoo kale dhinaca kale, waxaan shaqaalaha beeraha barnaa xogaha ku saabsan xuquuqahooda iyo adeegyada laga helo waaxda shaqada. Waxaan booqanaa beeraha si aan oga caawino shaqaalaha inay u hogaansamaan sharciyada shaqada. Sidoo kale waxaan beeraleyda ka caawinaa inay helaan shaqaale beero oo xirfadley ah si ay u buuxiyaan baahiyahooda shaqada. Nidaamyada DOCE ee codsiyada H-2A, waxay qabtaan kormeerada guryaha, waxay bixiyaan caawimaada wareysiga luuqada Isbaanishka, waxayna ka shaqeeyaan inay caawiyaan Waaxda Shaqada Mareykanka si loo hubiyo in heshiisyada H-2A loo hogaansamo.

### LA XARIIR DOCE

Taleefoonka: **877-466-9757 (877- IMM-WRKR)**

Iimaylka: **doce@labor.ny.gov**

Webseedka: **www.labor.ny.gov**